Australian Government
Attorney-General's Department

KA DHIG AUSTRALIA AMAAN
KA DHIG MACLUUMAADKA QULQULAYA

NATIONAL SECURITY HOTLINE
1800 1234 00

Kala-hagayaasha telefoonka telefoon kasta oo ay hellaan waxay u qaataan si dhab ah. Waxaad noqon kartaa qof aan la aqoon.

Amniga Qaranka – Faahfaahinta kastaa wax bay tartaa

Wax yar oo kasta oo macluumaad aan ka helno xubnaha bulshada wuxuu noogu fadhiyaa wax qiima leh xagga ka badbaadinta dadkeena argagixisada mustaqbilka. Badanaa faahfaahinta ugu yar ayaa samaysa macnaha ugu weyn. Sidaas darteed haddii aad aragto waxyaallo aan sax u muuqan, fadlan wac Khadka Amniga Qaranka kana dhig macluumaadka mid qulqulaya ama socda.

Waa maxay Khadka Amniga Qaranku?

Khadka Amniga Qaranka **(1800 1234 00)** waa telefoon lacag la'aana kaas oo kugu xira hay'adaha si loo soo sheego xarakaadyada argagixisada suurtagalka ah Australia gudaheeda. Khadku wuxuu shaqeeyaa 24ka saacadood ee maalintii, todobada maalmood ee asbuuca. Waa muhiim in laga dhigo macluumaadka mid qulqulaya - wax yar oo macluumaada oo laga hello dadweynaha wuxuu noqon karaa wax qiima weyn leh si looga dhigo Australia mid amaan ka ah argagixisada berrito.

Maxaa loo gudbinayaa Khadka Amniga Qaranka?

Argagixisadu waxay ku tiirsan tahay wax u dhaca si lama filaana, waana sababta keenta inay weligeed adkaan doonto inay siiso dadweynaha liisto sax ah oo astaamo u noqon kara aragixisanimada. Si kasta ha ahaatee, khibradaha dibada iyo kuwa gudaha ayaa na siiyey calaamadu digniina oo la eegayo. Halka hay'adaha amniga Australia aad uga shaqaynayaan ka ilaalinta argagixisanimada, xubnaha shacabka ayaa buuxin kara sawirka. Qoraalkani wuxuu na siinayaa tusaalayaasha lala soconayo ama la eegayo.

Sawir ka duubida aan caadiga ahayn ama sawir ka qaadida dismayaasha dawlada ama guryaha kale ee wadanka muhiimka u ah

Sawir ka duubidu waa mid ka mid ah hababka argagixisadu ku ururiyaan macluumaadka ku saabsan bartilmaameedka. Haddii aad aragto qof isticmaalaya fiidiyo, kaamirooyin, ama telefoonka kaamirada ah hab aan macna sax ah samaynayn (aan u muuqan inuu yahay dalxiise) waa inaad soo sheegtaa.

Baabuur laga shakiyi karo oo ku dhow dhismayaal muhiima ama goobo dadweyne oo mashquulla

Argagixisadu waxay isticmaalaan baabuur ay u isticmaalaan hadafyo kala duwan, sida soo ilaalaynta iyo bambooyin ku aasida. Waxaa laga yaabaa in baabuurta la dhigo muddo dheer oo aan caadi ahayn, mararka qaarkood meella aan baabuurta la dhigan karin. Waxyaallaha qarxaa waxay noqon karaan kuwa culus, sidaas darteed baabuurt yaryar iyo kuwa faanka ah ayaa hoos u degi kara culayska dartiis. Waxaa laga yaabaa in aanay lahayn diiwaangelin, ama leeyihiin taariko been ah ama aanay lahan taariko.

Baahiya degitaan oo laga shakiyi karo
Marmarka qaarkood, dadku waxay u isticmaalaan, u ijaartaan ama u gataan guryo si laga shakiyi karo halkaas oo laga yaabo inay ka wadaan xiriirinta weerar argagixiso. Dalka Ingiriiska, garaash la kiraystay ayaa laga dhigay warshada bambo samaynta. Xubin ka mid ah dadweynaha ayaa soo sheegay gelid iyo ka bixid siyaadada ah oo ay samaynayaan rag qaba galoofis, taas oo sababtay qabashada argagixiso horay saddex jeer u weerartay Gegida diyaaradha ee Heathrow.

Gadashooyin aan caadi ahayn oo kiimiko, waxyaallaha qarxa iyo qalabka xafidida
Kiimiko ayaa loo isticmaalay dhamaan weerarada argagixisada adduunka oo dhan. Kiimikooyinkaan si guud ayaa looga hellaa iyaga oo loo isticmaalo guriyaha, beeraha, xayawaanka, warshadaha ama qalabka isqurxinta. Haddii aad aragto gadasho aan caadi ahayn oo kiimikooyin iyo qalabka xafidaada, u sheeg Khadka Aminiga Qaranka.

Wax aan macna samaynayn
Dadka doonaya inay sameeyaan ficil argagixiso waxaa laga yaabaa inay u dhaqmaan si aan caadi ahayn ama si laga shakiyi karo, ama codsigoodu macne aanu samaynayn. Tusaale ahaan dabeecada aan macnaha samaynayn waxaa lagu arkay argagixisadii masuulka ka ahayd weerarkii 11kii Sebteembar ee wadanka Maraynka. Waxay qaateen tababar duulimaad, laakiin ma xiisaynayn sida diyaaradu u kacayso ama u degayso. In wax laga shakiyo ama aan laga shakiyin waxay ku xiran tahay xaallada. U fiiri xaallada si guud. Haddii qof xarakaadkiisu ku welwel geliyaan xagga dabeecad aan macne samaynayn, wac Khadka Amniga Qaranka ee 24ka saacadood tel: **1800 123400**.

Aqoonsiyo tira badan ama been ah
Dadka qorshaynaya inay sameeyaan ficil argagixiso waxay badanaa isticmaalaan dukuminti la soo xaday ama been ah, kuwaas oo ay ku jiraan kaararka deynta, baasabooro iyo laysamada dareewalada. Waxay kaloo leeyihiin aqoonsiyo badan kuwaas oo siinaya tafaasiil iska soo horjeeda dadka ay la xiriiraan.

Xasuuso: badanaa faahfaahinta ugu yar ayaa samaysa faraqa ugu weyn. Haddii aad aragto ama ogaato dabeecada kaa welwelinaysa, ka qaado macluumaadka ugu badan. Faahfaahinta caawimi karta hay'adaha waxaa ku jira: cinwaanada wadada, taariikhda, waqtiga, telefoon nambarka, taarikada iyo sharaxaada gaariga.

Faahfaahinta cidda lala xiriirayo
Haddii aad aragto ama maqasho waxyaalla aan macna samanayn, fadlan wac Khadka Amniga Qaranka wadna qulqulka macluumaadka. Xasuuso: badanaa faahfaahinta ugu yar ayaa ah tan samaysa macnaha ugu weyn.
Tel: **1800 123400**
Email: hotline@nationalsecurity.gov.au
Booqo: australia.gov.au/nationalsecurity